



OFFICE OF ARTS & CULTURE
CITY OF SEATTLE

Tilmaamaha Gabayaaga Madaniga ah ee 2025-26

Dulmarka Deeqaha

Xafiiska Fanka & Dhaqanka ee Seattle (ARTS), oo kaashanaya xaafiiska Suugaanta ee magaalada Seattle, waxay ku taageeraan gabayaaga khibrada leh labo Sano oo degenaansho ah.

Gabayaaga Madaniga ahi waa danjiraha dhaqameed ee muuqaalka suugaanta ee midabada badan leh oo hadanka ah ee Seattle, wuxuuna matalaa bulshada dhaqamada kala duwan ee Seattle. Kuwa abaalmarinta lo xushay ayaa heli doona \$25,000 Deeq ah labo sano laga bilaabo horaanta 2025 ilaa dhamaadka 2026. Marka laga soo tago dhacdooyinka sanadlaha ah ee Magaalada, Abwaanka Madaniga ahi waxa uu kobcin doonaa wada-hadalka bulshada iyo ka qaybgalka u dhexeeya Magaalada, dadweynaha, iyo fannaaniinta kale, isago ku muujinaya fanka suugaanta.

Isago ah safiirka Gabayada labada sano ee Magaalada, doorka Abwaanka Madaniga ahi waa inuu horumariyo qorshe-hawleed sanadeed, oo uu fuliyo fursado kala duwan oo hal abuur leh oo magaalada oo dhan ah, oo uu keeno warbixin xidhidh dhammaadka sannad kasta.

Fursadahaas waxaa ka mid noqon kara wax-akhris, aqoon-is-weydaarsiyo, mashaariic, iyo sidoo kale ka-qaybgalka hadalka - dhammaan iyada oo ay la socoto suugaanta iyo la-hawlgalayaasha bulshada. Abwaanka Madaniga ahi waxa uu curiyaa munaasibadaha guud ee isku xidha oo ka qayb qaata bulshooyinka, waaxyaha magaalada, iyo dadka deegaanka tasoo kor u qaadaysa qiimaha gabayga. Isago ah bandhige, Abwaanka Madaniga ahi waxa uu ka qayb-qaadan doonaa laba xafladood oo dadwayne oo sanadle ah magaalada Seattle, oo ah suugaanta iyo bisha gabayada qaranka.

Wixii macluumaad ah iyo kaalmaynta codsiga, u-qalmitaanka, ama taageerada farsamada ee khadka tooska ah, kala xidhiidh Zach Frimmel, Maareeyaha Mashruuca, **(206) 963-9226** ama Zach.Frimmel@seattle.gov.

Waxaan haysanaa turjubaano ku gula hadli kara luqadaada, kuwaaso ay ku jiraan Luqadda Calaadaha Ameerika (muuqaal ahaan). Nasoo wac oo noo sheeg luqadaad ku hadasho. Filo hakad gaaban inta aan heleyno turjumaan si uu ugu biiro wicitaanka.

Codsiga

[Ka codso online ado isticmaalaya Submittable](#). Waa bilaash in la codsado:

Haddii aadan lahayn kombuyuutar ama internet, kala xiriir Zach Frimmel, Maareeyaha Mashruuca, lambarka **(206) 963-9226** ama Zach.Frimmel@seattle.gov.

Taariikhda ugu danbeysa ee la codsan karo

Talaado, Agoosto 20, 2024, 5 galabnimo (Pacific)

U-qalmitaanka

Ka qaybgalku waxa uu u furan yahay gabayaaga fadhigoodu yahay Seattle kuwaas oo leh hay'ad shaqo oo dhisan oo ay ku jiraan shaqooyin la daabacay/ay daabaceen, akhrinta/ereyga lagu hadlo, oo lagu daray waayo-aragnimada qorshaynta mashruuca, iyo ku dhaqanka sinnaanta jinsiyadda. Waxaad xaq u leedahay haddii:

- Waxaad degan tahay Seattle (degaankaagu waa magaalada Seattle)
- Waxaad xaq u leedahay inaad ka shaqeyso Maraykanka.
- Waxaad jirta da'da 18+ waqtiga taariikhda kama-dambaysta ah ee codsiga
- Ma tihid arday ka diiwaan gashan heer kasta wakhtiga codsiga la qabanayo
- Waxaad muujisay xiisaha/waayo-aragnimada kor u qaadista sinnaanta iyo ku muujinta fanka
- Waxaad muujisaa qorshaynta iyo fulinta barnaamij adag oo iskaashi

Maalgelinta

Magdhawga labada sano ee Gunada Abwaanka Madaniga ahi waa **\$25,000**. Maalgelintu waa muddo laba sano ah waxayna dabooshaa wakhtiga qorista, maamulka, khidmadaha farshaxanka, bandhigyada, kharashyada dhacdada, agabka, safarka, ajuurada, cashuuraha, iyo kharashyada kale ee mashruuca la xiriira.

Kulanka Xogta (Isku-dhafka ah)

Baro wax badan oo ku saabsan barnaamijka iyo sida loo gudbiyo codsigaaga ugu fiican.

Isniin, Luulyo 22, 1 - 3 galabnimo (Pacific)

Qof ahaan: ARTS at King Street Station

303 S Jackson St, Seattle, WA 98104 (Dabaqa sare, Qolka 315)

Kulanka fogaanta: Kooxaha Microsoft

[JAWAAB](#)

Dib u eegista Qabyo Qoraalka Taariikhda codsiga

Talaado, Agoosto 6, 5 galabnimo (Pacific)

Codsadayaashu waxay soo gudbin karaan qoraal qabyo ah oo dib u eegis iyo faallo celin ah ilaa Agoosto 6 saacada 5 galabnimo (Pacific). **Kadib Agoosto 6**, maareeyayaasha mashruucu ma awoodaan inay bixiyaan jawaab celin buuxda laakiin waxay diyaar u noqon doonaan inay ka jawaabaan su'aalo kasta oo ay hubiyaan u-qalmitaanka ama dhamaystirnaanta.

Tageerada Codsiga

Si aad u codsato caawimada arjiga, iimayl u dir Maareeyaha Mashruuca Zach Frimmel Zach.Frimmel@seattle.gov Agoosto 6 si aad ugu dirto taleefan ama u qabsato kulanka fogaanta.